# U soo Sheegida Ciwaan Bedelida USCIS

Reporting a Change of Address to USCIS


***Siddani waa sidda looga bedelo ciwaankaaga hay'adda USCIS- ee aan ahayn sidda looga bedelo maxkamadda laanta socdaalka (immigration).***

Qaar badan oo ka mid ah foomamka USCIS waa ay isbedelayaan iminka! Ka eeg shabakada (USCIS website) si aad u hubiso in aad isticmaalayso foomkii ugu dambeeyey ka hor inta aadan waxba u dirin. Haddii aad u dirto foom khalad ah waxaa dhici karta inaad wax walba dib u bilowdo!

**Ogow:** Xeerarka soo sheegida bedelida ciwaanka ee qabanqaabiyeyaashu (sponsor). Haddii aad tahay kafiil, hubi inay jiraan akhbaar khaas ah oo uu ku leeyahay kafiilku qayb walba.

## Ma inaan ogaysiiyaa laanta socdaalka (immigration) kolka aan bedelo ciwaankayga?

Hadii aadan ahayn Muwaadin Mareykan ah (U.S.) waxa aad u baahan tahay inaad u sheegto hay’ada Muwaadinimada & Adeega Socdaalka [United States Citizenship & Immigration Service (USCIS)] meesha aad ku noolaanayso. Waa inaad ugu sheegtaa 10-cisho gudahood mar walba oo aad guurto ama aad ciwaanka bedesho.



Muwaadiniinta Mareykanka ah (U.S.) iyo kuwa aan muwaadinka ahayd wali ee **“qabanqaabiya”** muhaajir wadanka Mareykanka (U.S.) ku nool iyagoo saxiixaya “dhaarta gargaarka” waa khasab inay sidoo kale u sheegaan hay’ada (USCIS) kolka ay ciwaankooda bedelaan. Qabanqaabiyeyaashu waa inay ku soo sheegaan ciwaan bedelida 30-cisho gudahood.

## Sidee ayaan u soo sheegaa ciwaan bedelida?

Waxaa jira dhowr jid oo lagu soo sheegi karo bedelida ciwaanka qofka. Shabakada (website) USCIS waxaa ku jira akhbaar arrintan ku saabsan www.uscis.gov/addresschange.

- Haddii aad ku leedahay akoon khadka (online) ee hay’adda USCIS, waxa aad ka bedeli kartaa halkaa. Haddii aadan lahayn akoonka khadka (online) ka ah, waxa aad sameysan kartaa mid.
- Sidoo kale waxa aad buuxin kartaa foom warqad ah ka dibna waxa aad soo dhigi kartaa boostadda
- Ama waxa aad ku soo sheegi kartaa isbedelka ciwaankaaga telefanka

Shabakadda (website) USCIS waxaa la heli karaa iyadoo afka Ingiriiska iyo Isbaanishka ah. Waxa aad ka buuxin kartaa kaarka bedelida ciwaanka khadka (online) ka isagoo afafka Ingiriiska iyo Isbaanishka ah. Laakiin foomka la daabadan karaa kaliya waa afka Ingiriiska.

Ogow: Nidaamka iyo xaraysiga ciwaan bedelidu waa uu ka duwan yahay kuwa kale haddii kiiskaagu uu ku shaqul leeyahay:

- codsiga la yiraa VAWA (dagaal qoyska dhexdiisa ah)
- codsiga Fiisaha T (T Visa) (dhibanayaasha lagu takri fashay), ama
- codsiga fiisaha U (U Visa) (dhibane dambi)
- saamixida I-751 ee ku salaysan dagaalka qoyska dhexdiisa ah/tacadiga.

Nidaamku siddaa waa ka duwan yahay marka ay noqoto kiisaskaa xataa haddii aad noqoto waxa la yiraa LPR [aad hesho sharcigaaga (green card)] ama haddii aad dalbato dhalasho aad ku noqonayso muwaadin (Form N-400).

Gal barta http://www.uscis.gov/addresschange ama kala tasho qareen sharciyada laanta socdaalka (immigration) yaqaan kiisaska caynkaa ah.

**Online:**
Si aad khadka (online) ka uga xareysato waxa aad u baahan tahay inaad ku lahaato akoon hay'adda USCIS. Haddii aadan mid haysan waxa aad u baahan tahay inaad sameysato mid (need to create one). Kolka aad hesho akoon, gal barta, ka dibna ka raadi akhbaar ku saabsan bedelida ciwaankaaga. Foomka khadka (online) waxaa la heli karaa isagoo afka Ingiriiska kaliya ah. Ka Bedelida ciwaankaaga khadka (online) waxa ay u ogolaataa hay'adda USCIS inay isla markiiba ciwaankgaada degdeg u cusbaanaysiiso.

Hubi inaad daabacato bogga xaqiijinta ah kolka aad dhamaysato. Taasi waxa ay caawin inaad cadeyso inaad u sheegtay hay'adda USCIS ciwaankaaga cusub.

**Boosto ku dirida:**
Hadii aad doonayso inaad boostada soo dhigto foomka, gal www.uscis.gov/AR-11. Riix, Kaarka Ciwaan Bedelida Dadka Qalaad AR-11, Alien's Change of Address Card Form (PDF, 301 KB). Linkiga ayaa fura foomka. Waa aad ku buuxin kartaa kumbuyuutarka ka dibna daabici kartaa ka dibna gacanta ku buuxin kartaa.

Ka dib kolka aad buuxiso, ka sameyso nuqul aad adigu meel dhigato. Ciwaanka boostadda ee ay tahay inaad u dirto foomka waxa uu ku qoran yahay bogga labaad ee foomkan. Waa ra'yi wacan inaad ku dirto foomka boostada sugan aadna codsato rasiidka soo noqoshada. Xafiiska boostada ayaa ku sheegi sida arrintan loo sameeyo. Kolkaa waa ogaan kolka hay'ada USCIS ay hesho. Waadna cadeyn kartaa inaad dirtay hadii aad u baahato.

Waxa ay ku qaadan kartaa hay'adda USCIS 3-4 asbuuc inay cusbooaysiiso ciwaankaaga marka aad ugu dirto warqadda ciwaan bedelida boostada. Wixii degdeg u bedelid ciwaanka ah ee

markaa loo baahan yahay in la sameeyo, waxaa fiican in lagu sameeyo khadka (online) ka ama telefanka.

**Telefanka:**
Hadii aad u baahan tahay inaad degdeg u cusboonaysiiso ciwaankaaga, wac hay'ada (USCIS) Khadkeeda Adeega Macmilka ee ah 1-800-375-5283. Hadii aad u malaynayso in warqadaada shaqada ama kaarkaaga deganaanshaha rasmiga ah dhawaan boostada laguugu soo diri, waa ra'yi fiican in la waco hadii ciwaankaagu uu isbedelay. Waxa aad u baahan tahay inaad siiso dhamaan isla akhbaarta aad ku bixin lahayd Foomka AR-11, laakiin ma aad buuxinaysid foomka.


Aakhirka ku wada hadalka telefanka, Wakiilka Adeega Macmilka ee Hay'ada USCIS ka waa inuu ku siiyaa lambarka cadeynta ah. Qoro kaa. Sidoo kale waxaad waydiin kartaa in cadeyn laguugu so diro boostada. Adeega Macmilka ee Hay'ada USCIS kolkaa waa inay kuu soo dirtaa warqad cadeynaysa wicitaankaagii telefanka. **Meel dhigo warqdan ka timi hay'ada USCIS!** Hadii aadan warqada uga helin hay'ada USCIS 30-cisho gudahood, kolkii aad wacday ka dib, mar kale wac.

**Qabanqaabiyeyaasha:**
Hadii aad tahay muwaadin Mareykanka ah (U.S.) ama qabanqaabiye aan wali muwaadin noqon, waa khasab inaad cusboonaysiiso ciwankaaga adigoo buuxinaya **Foomka I-865 ee Ogaysiiska Bedelida Ciwaanka ee Qabanqaabiyaha.** Foomkan waa in boostada loogu soo diraa Hay'ada USCIS, lagamana xareyn karo khadka (on-line) ka. Ka daabaco shabakada hay'ada (USCIS), ee ah www.uscis.gov/I-865.

Hadii aadan ahayn muwaadin **aadse** tahay qabanqaabiye, waa inaad xareystaa labadaba Foomka AR-11 iyo Foomka I-865.

## Ka waran hadii aanan soo sheegin ciwaan bedelid?
Waxaa lagugu soo oogi karaa dacwo dambi. Aad ayey muhiim u tahay inaad ku soo sheegto isbedelka Foomka AR-11 10-cisho gudahood guurida ka dib.

Hay'ada USCIS waa inay cadeyso inaadan kas u soo sheegin ciwaanka isbedelay. Hadii lagugu helo dambigan, waxaa lagu ganaaxi karaa ilaa $200, waxaana lagu xiri karaa ilaa iyo 30-cisho. Sidoo kale waa lagu masaafurin karaa.



Soo sheegida ciwaan bedelidu waa mid ka mid ah mas'uuliyadaha saaran dadka aan muwaadinka ahayn hadii ay doonayaan inay sii joogaan wadanka U.S. ama ay ka helaan sharci laanta socdaalka (immigration) ee wadanka mustaqbalka.

Hadii aad tahay **qabanqaabiye** aan ku soo sheegin bedelida Foomka I-865 30-cisho gudahood, waa lagugu ganaaxi karaa soo sheegid la'aanta isbedelka.

## Kiiska Socda

Hadii aad ka xareyso ciwaan bedelid khadka (online) ka, shabakadu waxa ay ku waydiin adiga akhbaar ku saabsan wixii codsiyo kale ah ee kuu socda wali. Taa macnaheedu waa codsiyo aad dirtay laakiin hay'ada USCIS aysan wali go'aan ka soo saarin.

- Shabakaddu (website) waxa waxa ay ku waydiin lambarka rasiidka codsiga wali ay hawshiisu socoto. Lambarkan waxa uu ku yaal qaybta kore ee wixii ogaysiis ah ee aad heshay ee kiiska ku saabsan. Wuxuu ka bilowdaa 3 xaraf ka dibna waxaa xiga 10 lambar.

- Geli akhbaartan, xafiiska hay'adda USCIS ee haysa codsigaaga ayaa markiiba loo sheegi.

- Xaqiijin (cadeyn) ah inaad soo sheegtay isbedelka meelna dhigo.

- Waxaad kaloo wici kartaa si aad u cusboonaysiiso ciwaankaaga si aad u hubiso inuu sax yahay kan ay kaa hayaan.

**Arrin Muhiim Ah:**

Hadii aad leedahay codsi wali hawshiisii socoto aadana u sheegin isbedelka ciwaankaaga hay'ada USCIS ee codsigaa, kama aad heli doontid hay'ada USCIS warqado ku saabsan go'aanada ama akhbaar muhiim ah oo kiiskaaga ku saabsan. Taasi waxay dhalin kartaa in hay'ada USCIS ay diido manfacyada laanta socdaalka aad ka codsatay. Noocyo ka mid ah kiisaskaa, arrintani waxa ay dhalin kartaa in mas'uuliyiinta laanta socdaalku ay ku geliyaan adiga liiska dadka ay rabaan in ay masaafuriyaan.

Hadii boostadu aysan ogayn ciwaankaaga cusub iyana, waxaa dhici karta inay geeyaan warqadaada shaqada ama kaarkaaga daganaanshaha rasmiga ah ciwaankaagii hore. Kolkaa kaarkaaga waxaa loo tixgelin inuu dhumay. Taa macnaheedu waa inay khasab noqoto inaad dib u codsato mar labaad warqadaada shaqada ama kaarkaaga daganaanshaha rasmiga ah. Waxaa iyana suurta gal ah inaad bixiso khidmada codsiga mar labaad.

Hadii kaarkaaga loo diro ciwaan khalad ah waxaa dhici kara in qof kale uu helo kaarkaaga uuna khaa'inimo ku sameeyo isagoo magacaaga isticmaalaya. Hadii aad og tahay in kaarkaaga la geeyey ciwaankaagii hore, waxaa dhici karta inaad u baahato inaad bilayska u sheegto in kaarka la xaday.

Waxaad kalood u diri kartaa warqad ku saabsan ciwaan bedelida ka dib kolka aad wacdo. Kolkaa, waxa aad hubinaysaa in hay'ada USCIS ay heshay akhbaarta. Hadii aad doonayso inaad arrintan sameyso, qor warqad leh:



- magacaaga oo buuxa,
- lambarkaaga diiwaangelinta dadka qalaad,
- lambarka rasiidka codsigaaga iyo
- ciwaankaaga cusub iyo kaagii hore labadaba.

Ku lifaaq nuqulka ogaysiiska rasiidka ee codsigaaga wali socda. Boostada u dhig warqadan adigoo ku hagaajinaya xafiiska hay'ada USCIS ee codsigaagu ka socdo.

Ugu dir warqada boostada sugan. Meel dhigo nuqul warqada ah iyo rasiidka boostada sugan.

**Xasuusnow!**
Hadii kiiskaaga laanta socdaalku uu ku shaqo leeyahay Foomamka I-360, I-918, I-914 ama I-751 (ku salaysan dagaal qoyska dhexdiisa ah) KUMA bedeli kartid ciwaankaaga khadka (online) ka ama telefan. Waa inaad raacdaa tilmaamaha gaarka ah ee ku jira shabakada http://www.uscis.gov/addresschange.



## Dadka aan sharciga lahayn

*hadii aadan ahayn muwaadin wax sharci ahna aadan ku lahayn wadanka U.S., aadana lahayn wax codsi sharci ah ee kuu socda oo aad sugayso, hel talo dhanka sharciga ka hor inta aadan u sheegin hay'ada USCIS ciwaan bedelidaada.*

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**